



Ku noolaashaha Iswiidhen

Adiga ku cusub Iswiidhen oo ku nool degaanka Alingsås

Somaliska



ALINGSÅS
KOMMUN



Buuggan yar waxa loogu tala galay qofka ku cusub Iswiidhen iyo degaanka Alisgs-ås wuxuuna wataa warbixin yar oo kuu wanaagsan inaad la socoto. Is-dhexgalka wuxuu ku saabsan yahay la socoshada ka mid ahaashaha bulshada.

Waxa loola jeedaa in dadkoo dhami ay dareemaan Iney ka tirsan yihiin bulshada iswiidhishka. Qeyb ka Mida taasi waa inaad la socotaa xuquuqdaada iyo Waajibaadka ku saaran. Xuquuqaha bani'aadamka Ayey ku saleysan yihiin qaar badanoo ka mida Shuruucda Iswiidhen.

Xuquuqda bani'aadamka iyo sinaanta Ragga iyo dumarka

Cahdiga Qaramada Midowey ee xuquuqda Bani'aadamka wuxuu ka hadlayaa sida dadkoo Dhami u leeyihiin qiimeyn iyo xuquuq siman. Dadkoo dhami waxey xaq u leeyihiin iney sheegaan Fikirkooda, aaminaan ilaahey doonaan oo doortaan Lamaanaha ay la noolaan lahaayeen. Cahdiga Xuquuqda bani'aadamka ayaa quseeya dhamaan Dadka ku nool dunida oo dhan.

Sinaanta ragga iyo dumarku waxey ku saabsan tahay in ragga iyo dumarku siman yihiin. Ragga iyo dumarkuba waxey leeyihiin xuquuq iyo waajibaad isku mid ah.

Waa iney midda kale helaan awood isla eg ee saameynta bulshada iyo noloshooda. Marka qof si ka liidata dadka kale loola dhaqmo taasoo loo eegay qofka oo rag ama dumara waxey taa noqoneysaa takoor loo eegay jinsiyadda.

Guurka

Guurku waxa loola jeedaa aqal gelid. Dhamaan dadka ku nool Iswiidhen waa In da'doodu gaartaa 18 sano si ay u guursadaan. Taa sharciga ayey ku taal. Sharciga ayaa quseeya dhamaan dadka ku Nool Iswiidhen xataa haddii aaney heysan Dhalasho Iswiidhish ah. Sida uu qabo sharciga Iswiidhen waxaanu qofku guursan karin marka:

- uu isaga ama qofka uu guursanayo ka yar yahay 18 sano
- qofku qaraabo soke la yahay qofku guursanayo
- qofka guursanaya ama kuu guursanayo guur ku jiro Ama u diiwaan gashan yahay lamaane

Sharciga iswiidhishku waa mamnuucayaa guur Qasab ah. Taa waxa loola jeedaa inaan qofina Ku qasbi karin qof kale guur. Qof walba waa inuu Isagu go'aan ka gaaraa ciduu guursanayo.

Xuquuqda caruurta

Wadamada oo dhan badankoodu waxey Leeyihiin shuruuc iyo qawaaniin difaacaya Caruurta iyo dhalinyarada. Caruurta iyo Dhalinyarada Iswiidhen waxa difaacaya Shuruucda caalamiga iyo kuwa qaran. Iswiidhen aad baa xil la isaga saaraa Xuquuqda caruurta iyo waliba ka difaaca Hanjabaad iyo gacan ka hadal. Iswiidhen ayaa saxiixday cahdiga qaramada mi-doobey Ee heshiiska caalamiga caruurta. Heshiiskaa Caalamiga waxaa ku yaal shuruuc difaaceysa Xuquuqda bani'aadamka ee caruurta. Taa waxa Loola jeeda sida in caruurta laga difaaco takoor, In caruurta xaq u yeelato iney sheegaan fikir kooda Iyo in la dhageysto iyo caruurtu xaq u leeyihiin in Laga difaaco gacan ka hadal guriga ah. Caruurta waa In laga difaaca walidka iyo dadka kalee waaweyn Ee isticmaala gacan ka hadalka ama aan caruurta U xanaaneyn sida saxda ah.

Gacan ka hadalka dadka leh xiriirka soke

Gacan ka hadalka dadka leh xiriirka soke waxa loola jeedaa metelan isticmaalka Xoogga adigoo kontoroolaya, garaacaya Ama wax u hanjabaya. Iswiidhen waa mamnuuc Inaad qof kale u isticmaasho gacan ka hadal. Waa Meel ka dhac ee xuquuqda bani'aadamka dad kale Waa fal danbi ah. Sidaa darteed waa mamnuuc isticmaalka Gacan ka hadalka reerka gudhiisa. Taa waxa loola jeedaa iney Mamnuuc tahay in la garaaco caruurta, ninkaada, naagtaada ama Qofka aad la nooshahay.

Mamnuuca u isticmaalka xoogga caruurta sharciga

Iswiidhishka waxa jirta qeyb loogu yeero xeerka walidka. Qeyb ka mida sharciga waxa loogu yeeraa sharciga diidmada



Uleynta kaasoo ka jiray Iswiidhen ilaa iyo sanadki 1979. Uleynta Erey hore oo iswiidhish ah oo loola jeedo garaacidda caruurta iyadoo Ujeedada laga leeyahay tahay barbaarin. Sharciga diidmada uleynta Ayaa sheegaya iney mamnuuc tahay isticmaalka gacan ka hadal jir Iyo mid maskax si caruurta loo tarbiyadeeyo. Gacan ka Hadal waa noocyada kala duwan garaaca jirka. Xataa garaacid yar, timo ka jeedid iyo qanjaruufo waa gacan ka hadal.

Gudniinka dumarka

Wadamo badan waxa la gudaa dumarka. Gudniinka Dumarka waxa loola jeedaa in la jaro qeyb ka mida Xubinta taranka dumarka. Gudniinka dumarka Iswiidhen Waa mamnuuc. Sharciga ayaa sheegaya in-

aan la sameyn Karin gudniin xataa haddii qofku ogol yahay. Qofka fuliya gudniinka dumarka waxa lagu xukumi Karaa xabsi. Qofka ayaa lagu xukumi karaa Iswiidhen Xataa haddii uu gudniinku ka dhacay dal kale.

Warbixinta muhimka ee xiriirka

Adeega bulshada: 0322-61 60 00

Adeega bulshada ayaa sida ugu badan ka Shaqeeya arimaha tabaruca ee waxqabadka Bulshada sida talo siinta, gargaarka iyo daweynta. Adeega bulshada wuxuu la shaqeeyaa oo kale Gargaarka caruurta iyo dhalinyarada ee dhibku Soo gaaro, reeraha xarurta haya, gargaarka Gacan ka hadalka ka dhaca xiriirka sokeeye, gargaarka Dadka balwadda leh, gargaarka dadka maanka naafada Ka ah iyo xuquuqda reeraha.

SOS Alaarmo: 112

Haddii qatara kula soo gudboonaato, ama Uu shil ku helo ama u baahato gargaar degdeg Wac 112. Wax intaa dhaafsan ka aqriso www.sosalarm.se

Vårdguiden: 1177

Haddii aad xanuunsato ama u baahato talo Daryeel caafimaad. Hagaha daryeelka wuxuu Ka jawaabayaa su'aalahaada, xukminayaa baahidaada Daryeel, ku siinayaa talo kuuna tilmaamayaa hey'adda Saxa ah ee daryeelka caafimaad. Hagaha daryeelka waxa Ka shaqeeya kal-kaaliyaal caafimaad oo leh xirfad weyn ee Aqoon iyo waayo aragnimo dheer. Wax intaa dhaafsan ka aqriso www.1177.se

Polisen: 114 14

Haddii aad qabto su'aalo ama dooneyso

inaad war U gudbiso boliiska. Mida kale lambarka ayaa loogu tala galay Gargaarka bulsho ee deg dega ah, kaasoo Ka shaqeeya dhibaatooyinka bulsho ee deg dega ah Xil-iyada weekendhiga iyo maalmaha cas, oo loola Jeedo waqtiyada kale ee aanu adeega bulshadu Furneyn. Wax intaa dhaafsan ka aqriso www.polisen.se

BRIS, Barnens hjälptelefon: 116 111

Caruurta ayaa wici kara oo wax kasta kala hadli kara qof weyn. Wax intaa dhaafsan ka aqriso www.bris.se

BRIS, telefoonka dadka waaweyn: 0771-50 50 50

Haddii aad qabto su'aalo ku saabsan caruurtaada Ama caruur kale. Wax intaa dhaafsan ka aqriso www.bris.se

Terrafem: 020-52 10 10

Terrafem waa urur bulsho oo la shaqeeya dumarka ajnabiga ee gacan ka hadalka loola Tago. Telefoonka heeganka ee Terrafem waxa dumarka la dilo ka heleyaan gargaar Wada hadal iyo talo siin afkooda hooyo ah. Wax intaa dhaafsan ka aqriso www.terrafem.org

Utväg: 0707 - 16 09 29

Utväg ayaa bixiya gargaar lacag la'aana iyo Daweynta dumarka iyo ragga dilka ehel sokeeye u geysto iyo dumarka iyo ragga qaba dhibaataada xanaaga iyo dil geysashada. Wax intaa dhaafsan ka aqriso www.utvag.com

www.informationsverige.se

Boggan ayaa loogu tala galay adiga Ku cusub Iswiidhen oo doonaya inaad Hesho warbixin fudud oo dhaqsa ah kuna Saabsan bulshada iswiidhiska. Wax intaa dhaafsan ka aqriso www.informationsverige.se

